Isbitaalka Carruurta ee Minnesota

Sharciga Qaansheegadka iyo Habka Soo-qaadidda Lacagta

Sharciga: Marka la iska rabo kharashka caafimaadka, isbitaalku waxa uu bukaanka/ kafaaladqaadayaasha ula dhaqmaa si ay ka muuqato xushmad, sharaf iyo akhlaaq; wuxuu isbitaalku muujiyaa dabacsanaan iyo in uu yahay abaabulaha ilaha daryeelka caafimaadka. Sharcigan waxaa loo sameeyey siyaabaha ay tahay in la raaco oo looga qaanbaxo Isbitaalku marka uu bukaanka ka rabo kharashka caafimaadka. Looma dulqaadan karo shaqaalaha qaabbilsan in ay dadka weydiiyaan kharashka caafimaadka Isbitaalka in ay bukaanka kula dhaqmaan wax noqon kara falfalxumo, handadaad, beenabuur, khiyaamo ama hadalxumo.

Sababeyn: Sharcigan wuxuu khuseeyaa kharashka caafimaadka ee laga rabo qofka buka ama kafaalaqaadayaasha la xiriira Isbitaalka Carruurta qeybihiisa kala duwan ee adeegga qaansheegadka (isbitaal, dhakhtar, daryeelka guryaha, iyo shirkadaha kale ee isbitaalka kala shaqeeya adeegga caafimaadka).

Ujeeddo: In la sameeyo sharci lagu maamulo sida bukaanka/kafaaladqaadayaasha looga soo qaado kharashka caafimaadka, iyada oo la raacayo habka lagu muujiyey hashiis loo gudbiyey Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota, iyo iyadoo la waafajinayo Sharciga Hay'adda Canshuuraha Qeybta 501(r).

Qeexid:

Cabasho: Wixii xiriir ah ee nooga yimaada bukaan/kafaaladqaadayaasha ee ay uga hadlaan dhibaato ku saabsan habdhaqan ay kala kulmeen shaqaalaha Isbitaalka ama shirkad ku hawlan soo-qaadidda lacagaha kharashka caafimaadka, ama xafiis qareen oo loo idmaday soo-qaadidda kharashka caafimaadka ee Isbitaalka.

Dedaalka Aan Caadiga Ahayn ee Soo-qaadidda Lacagta (ECA) Waxaa jira afar nooc oo ah habab lacagta lagu soo qaado oo loo tixgeliyo hababka aan caadiga ahayn ee soo-qaadidda lacagta (ECA);

1) In lagu dhaqaaqo hab u baahan sharci ama nidaam qaanuuni ah (sida inaan xaq u yeelanno la wareegidda iyo iibinta hanti dad leeyahay, inaan hanti ma guurto ah kala wareegno, in sharci ahaan mushaar dad toos looga soo gooyo kharshka, inaan gacanta ku dhigno xisaab bangi dad u taalla ama hanti, inaan dadka ku soo oogno dacwad madani ah, inaan dad xiri karno
2) Kharashka aan sugeyno inaan shirkad saddexaad ka sii iibinno
3) Inaan warbixin xun u gudbinno xafiisyada sumcadda amaahda ama xafiisyo kale
4) Arrimo dibudhac ama diidmo dadka ku keeni kara (ama dadka uga baahan in ay qaanbaxaan intaan wax loo qaban) caafimaad ahaan wixii muhiim u ah daryeelkooda iyadoo loogu diidayo qaanbixid la'aanta daryeel hore loona eegayo sharciga kaalmada dhaqaalaha ee

dadka ka bixin lahaa lacagta

Kaalmo Dhaqaale: Isbitaalka wuxuu bukaanka iyo/ama kafaaladqaadayaasha u hayaa barnaamij ah kaalmo dhaqaale oo noqon karta qiimadhimista dadka dhibaateysan iyo barnaamijka qiimadhimista bukaanka aan ceymis lahayn. Qoys in ay xaq u yeeshaan kaalmada dhaqaale waxay ku xiran tahay dakhliga, tirada dadka guriga ku nool, in ay awoodi karaan kharashka iyo/ama ceymiskoodu inta uu ka bixinaayo. Tirada dadka guriga waxaa loo eegaa sida uu sharcigu dhigayo.

Luuqad Fudud oo Kooban: Sharraxaad yar oo ku saabsan shuruudaha xaq loogu yeesho, hannaanka codsiga iyo kaalmada intaba waxaad ka heleysaa sharciga kaalmada dhaqaalaha

Hannaanka:

Sharciyada La-xiriiridda Shaqaalaha iyo Bukaanka:

1. Xilliyada is-diiwaangelinta ka hor, xilliga is-diiwaangelinta, ama marka bukaanka la seexinayo, Isbitaalka wuxuu sameyn doonaa:
   a. In la aqoonsado dhammaan shirkadaha saddexaad ee ay waajib ku tahay in ay bixiyaan adeegga bukaanka, iyo
   b. In la aqoonsado bukaannada xaq u yeelan kara in ay kaalmo dhaqaale ka helaan Isbitaalka iyadoo la eegayo sharciga Kaalmada Dhaqaalaha.
2. Kolka la sameynayo jadwalka ama is-diiwaangelinta bukaanka/ kafaalaqaadayaasha ayey waajib ku tahay in ay haystaan macluumaadka ceymiska oo sax ah. Arrimahaas waxaa ka mid ah in Isbitaalka la tuso koobbiyada kaararka ceymiska oo dhan, sida macluumaadka kaarka caafimaadka dowladda.
3. Bukaannada xaq u yeelan kara kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka, shaqaalaha ayaa ku wargelin doona sharciyada iyo sida loo adeegsan doono.
4. Dhammaan shaqaalaha Isbitaalka ee si toos ah bukaannada ula xiriira waxaa sannad kasta lala socodsiin doonaa kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka. Waxyaabaha lala socodsiin doono waxaa ka mid ah barnaamijyada kala duwan ee loo hayo bukaannada Isbitaalka, sida ay bukaanku ku heli karaan macluumaad dheeraad ah iyo sida ay u soo gudbin karaan codsiga kaalmada dhaqaale.
5. Isbitaalka wuxuu bukaannada kula xiriiri doonaa luuqad fudud oo kooban oo ku saabsan sharciyada Kaalmada Dhaqaale. Luuqadda fudud ee kooban waxaa loogu tala galay oo la siin doonaa qoysaska oo dhan marka ay is diiwaan gelinayaan. Intaas waxaa dheer in foom codsi ah la soo raacin doono waraaqda ugu horreysa ee isbitaalka, taasoo ay ku qornaan doonto kharasha la iska rabo, macluumaadka ceymiska, waxyaabo kale iyo habka lagu helo kaalmo dhaqaale.
6. Dadka aan aqoon fiican u lahayn afka Ingiriiska waxaa loo hayaa turjumaad qoran oo ah sharciga qaansheegadka iyo kharashka laga rabo, foomka codsiga iyo luuqad fudud oo kooban.
7. Dhammaan waraaqaha caddeynaya in bukaannada laga rabo kharashka caafimaadka waxaa ku jiri doona ugu yaraan macluumaadka soo socda:
   a. lambar magaalada ah ama lambar lacag la'aan lagu garaaco oo ay bukaanku kala soo xiriiri karaan wixii ah su'aalo ama kharashaad ay dood ka qabaan;
   b. cinwaan ay bukaanku u soo qori karaan waraaqo ah su'aalo ama

kharashaad ay dood ka qabaan;

c. inay tixraacaan Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka ee ay heli karaan; iyo
d. sida uu qabo Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota, macluumaadka soo socda waa in ay qaabka wax loogu qoro isku mid tahay gudaha waraaqaha: "Haddii aad dareento in aan laga hadlin wixii dhib ah ee ku haysta fadlan ugu horreyn la soo xiriir xarunta adeegga macaamiisha oo waxaad siisaa fursad ay uga hadlaan wixii dhib ah ee ku haysta. Haddii aan weli xal loo helin oo aan laga hadlin wixii dhib ah ee ku haysta waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota oo aad ka heli karto 651-296-3353 ama 1-800-657-3787."

Hannaanka qaansheegadka Isbitaalka

Qaansheegadka Isbitaalka/Xarunta:

Bukaanka/kafaaladqaadaha aan ceymis haysan:

1) 5 maalmood ka dib marka isbitaalka laga baxo, qofkii aan haysan ceymis ama bukaanka/kafaaladqaadaha waxay heli doona waraaq caddeyneysa kharashka, waxaa laga codsan doonaa macluumaad ceymis haddii ay hayaan, waxaa la siin doonaa koobbiga foomka codsiga kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka, wixii macluumaad ah oo ku saabsan qofka lala soo xiriiri doono iyo koobbi ku qoran luuqad fudud oo kooban
2) Haddii bukaanka/kafaalaqaadaha ay ku soo jawaabi waayaan 30 maalmood gudahood iyo mar kale ilaa 60 maalmood, xisaab-xirid ayaa loo diri doonaa bukaanka/kafaalaqaadaha si loo ogeysiiyo lacagta laga rabo. Xisaab-xiridda waxaa loo soo raacin doonaa macluumaadka loo hayo ee kaalmada dhaqaale iyo taleefanno arrintaas khuseeya
3) Haddii bukaanka/masuulka ay ka soo jawaabi waayaan ka dib marka loo diro saddex waraaqood, ogeysiis kama dambeys ah ayaa loo diri doonaa bukaanka iyo kafaaladqaadaha si loo tuso in kharashka loo gudbin doono xafiisyo ka shaqeysta soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey. Taasi waxay sababeysaa dedaalka aan caadiga ahayn ee soo-qaadidda lacagta (ECA).
4) Bukaanka ama kafaalaqaadaha ayaa nala geli kara qorshe dib u bixin ah iyadoo loo eegayo kharashka lagu leeyahay

Bukaanka/kafaalaqaadaha ceymis haysta:

1) 1 maalin ka dib bixinta lacagta ceymiska, bukaanka/kafaalaqaadaha xisaab-xirid ayaa loo diri doonaa haddii ay jirto lacag ku harsan bixinta ceymiska ka dib.
2) Haddii bukaanka/kafaalaqaadaha ay ku soo jawaabi waayaan 30 maalmood gudahood iyo mar kale ilaa 60 maalmood, xisaab-xirid ayaa loo diri doonaa bukaanka/kafaaladqaadaha si loo ogeysiiyo lacagta baaqiga ah ee laga rabo. Waraaqda la soo diri doono waxaa ku jira macluumaadka loo hayo ee kaalmada dhaqaale iyo taleefanno arrintaas khuseeya
3) Haddii bukaanka/kafaalaqaadaha ay ka soo jawaabi waayaan ka dib marka loo diro saddex waraaqood, ogeysiis kama dambeys ah ayaa loo diri doonaa bukaanka/kafaalaqaadaha si loo tuso in kharashka loo

gudbin doono xafiisyo ka shaqeysta soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey. Taasi waxay sababeysaa dedaalka aan caadiga ahayn ee soo-qaadidda lacagta (ECA).

4) Bukaanka/kafaalaqaadayaasha waxay nala geli karaan qorshe dib u bixin ah oo aan ka badneyn 12 bilood

Habka Qaansheegadka ee Dhakhtar/Kilinig:

1) Bukaannada aan ceymis haysan markay isbitaalka ka baxaan ayey naga heli doonaan xisaab-xirid kala ah hal mar iyo saddex mar maalmaha 30, 60 iyo 90
2) Bukaannada ceymis haysta lacag-bixinta ceymiska ayey naga heli doonaan xisaab-xirid badan hal maalin ka dib iyo saddex mar oo kale 30 maalmood oo kala fog.
3) Haddii aan la helin wax lacag bixin ah ama Isbitaalku ku guuleysan waayo in uu la xiriiro bukaanka/kafaalaqaadayaasha, xisaabta waxaa lagu wareejin doonaa xafiisyo ka shaqeysta soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey si ay tallaabo uga qaadaan. Taasi waxay sababeysaa dedaalka aan caadiga ahayn ee soo-qaadidda lacagta (ECA)

Wixii qiimadhimis ah ee loo sameeyo bukaanka/kafaalaqaadaha iyadoo sababtu ay tahay sharciga kaalmada dhaqaale awgiis ama sharciga qiimadhimista loo sameeyo dadka aan ceymiska haysan, xisaab-xiridda ayaa lagu dari doonaa ka dib marka qoyska bukaanka loo oggolaado kaalmo.

Foomka codsiga ee kaalmada dhaqaale waxaa la tixgelin doonaa ilaa iyo 240 maalmood laga soo bilaabo taariikhda xisaab-xiridda koowaad marka loo diro bukaanka ama kafaalaqaadaha. Foomka codsiga kaalmada dhaqaale uma baahna in kol labaad la soo gudbiyo ilaa saddex bilood ka dib taariikhda foomka codsigii u dambeeyey

Waaxda dhaqaalaha ee Isbitaalka oo la shaqeyneysa golaha sharciga ee isbitaalka ayaa iska leh go'aanka kama dambeysta ah haddii lagu dhaqaaqi doono falal la xiriira soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey sababtoo ah waa in la sameeyo dedaal macquul ah haddii ay jiri karaan bukaan/kafaalaqaade xaq u yeelan kara kaalmo dhaqaale.

Haddii foom codsi ah oo buuxsan la soo gudbiyo maalinta 240-aad ee xilliga foomka codsiga, isbitaalku waa uu u tixgelin doonaa oo ma sameyn doono dedaal aan caadi ahayn oo ah soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey, balse waxaa go'aan laga gaari doonaa haddii bukaan/kafaalaqaade ay xaq u yeelan karaan oo si qoraal ah ayaa lagu soo wargelin doonaa go'aanka iyadoo loo gudbinayo xisaab-xirid qaansheegad oo muujineysa lacagta lagu leeyahay iyo sida loo go'aamiyey.

Isbitaalku kuma dhaqaaqayo in ay bilaabaan dedaal aan caadi ahayn iyo falal la xiriira soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey ugu yaraan 120 maalmood ka dib laga soo bilaabo maalinta isbitaalka laga baxo xisaab-xiridda ugu horreysa.

Lacag soo celinta ka badan sharci ahaan kaalmada dhaqaale ee la iska rabo waxaa laga reebayaa qeybta uu bixiyo marka loo adeegayo bukaanka ceymis haysta.

Ka-jawaabidda Sua'aalo ama khalaafaad Bukaan/Kafaalaqaade:

1. Isbitaalku wuxuu ku dedaali doonaa in uu sida ugu dhakhso badan uga jawaabo qaansheegadka caafimaadka iyo dhammaan su'aalaha ama khilaafaadka bukaanka/kafaalaqaadeyaasha. Ka-jawaabidda su'aalaha waxay noqon kartaa qoraal ama mid afka la isaga sheego hadba kii ku habboon.
   a. Su'aalaha taleefanka waxaa laga jawaabayaa hal (1) maalin gudaheed.
   b. Su'aalaha qoraalka waxaa laga jawaabayaa toban (10) maalmood gudahood.
2. Hawlaha soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey waa la hakinayaa haddii uu bukaan shaqaalaha u sheego:
   a. in bukaanka aan lagu lahayn wax qaansheegad ah qeyb ama gebi ahaan; ama
   b. in shirkad saddexaad ay bixin doonto wixii qaansheegad ah; ama
   c. in bukaanku u baahan yahay caddeyn la xiriirta qaansheegadka; ama
   d. in bukaanku rabo foomka codsiga kaalmada dhaqaale.
3. Hawlaha soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey waxaa la sii wadi doonaa soddon (30) maalmood ka dib marka bukaanka caddeyn loogu diro cinwaankii ugu dambeeyey ee wakhtigii su'aalaha bukaanka ama haddii bukaanku soddon (30) maalmood gudahood ku soo diri waayo foomka codsiga kaalmada dhaqaale.

Sida loola Xiriiro Bukaannada/ Kafaalaqaaday aasha:

1. <u>Intaan la isu gudbin xafiisyada soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey.</u>
   a. Haddiii ay su'aal ka timaaddo in qofka loo diray qaansheegadka uu yahay qofkii adeegga loo sameeyey, shaqaalaha Isbitaalka ayaa xaqiijin doona macluumadka qofka xaqiiqadii lagu leeyahay lacagta caafimaadka ee ay tahay in lagu dallaco qaansheegadka. Shaqaalaha Isbitaalka ee soo-qaadidda lacagta ayaa xaqiijin doona macluumaadka saxda ah ee khuseeya kafaalaqaadaha shirkadda saddexaad ee ay waajibka ku tahay bixinta adeegga daaweynta bukaanka.
   b. Inta ay socoto xiriirka koowaad ama wixii kale oo ah la-xiriirid ee lala sameeyo bukaan/kafaalaqaade oo ay sababtu tahay soo-qaadidda lacagta caafimaadka, haddii ay dhacdo in uu bukaan/kafaalaqaade caddeeyo in aysan si buuxda u bixin karin lacagta caafimaadka hal mar, shaqaalaha Isbitaalka ayaa kala hadli doona waxyaabaha soo socda oo dhan:
      i. Bukaanka/kafaalaqaadaha waxa ay lacagta caafimaadka ee laga rabo ku bixin karaan laba-iyo-toban bilood oo ah bil kasta; haddii wakhtiga loo badin doono waa inuu maamule ka yeelo iyadoo kiis kasta si gooni ah loo eegayo;
      ii. Bukaanka/kafaalaqaadaha wuxuu codsan karaa foomka kaalmada dhaqaale.
   c. Haddii bukaanka/kafaalaqaadaha uu rabo inuu codsado kaalmo dhaqaale, shaqaalaha Isbitaalka ayaa foomka codsiga ugu soo diri doona cinwaankiii ugu dambeeyey ee bukaanka laga hayo oo waxay hakin doonaan hawlaha soo-qaadidda lacagta la bixin waayey ilaa 30

maalmood. Hawlaha soo-qaadidda lacagta la bixin waayey dib ayaa loo bilaabayaa 30 maalmood ka dib haddii aan la helin codsiga foomka kaalmada dhaqaale ama haddii codsigaas la soo diido.

d. Isbitaalku kuma dhaqaaqayo in ay bilaabaan dedaal aan caadi ah iyo falal la xiriira soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey ugu yaraan 120 maalmood ka dib laga soo bilaabo maalinta isbitaalka laga baxo xisaab-xiridda ugu horreysa.

2. <u>Ka dib marka la isu gudbiyo qareen ama xafiiska soo-qaadidda lacag la bixin waayey.</u>
   a. Haddii uu bukaan/kafaalaqaade shaqaalaha Isbitaalka ula soo xiriiro arrimaha soo-qaadidda lacagta caafimaadka ka dib marka loo gudbiyo qareen ama xafiiska soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey, Isbitaalku wuxuu ka xaqiijin doonaa macluumaadka shaqsiyeed si loo hubsado haddii ay jirto sabab macquul ah bal in bukaanka lagu leeyahay lacagta, oo waxaa laga hubsan doonaa in si sax ah qaansheegadka loogu diray kafaalaqaadaha shirkad saddexaad. Haddii bukaanku shaqaalaha Isbitaalka siiyo macluumaad cusub oo la xiriira kharashka amaahda ah, shaqaalaha Isbitaalka ayaa la xiriiri doona qareenka ama xafiiska soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey si ay u siiyaan macluumaadka cusub una hakiyaan hawlaha soo-qaadidda lacagta ilaa la soo baaro macluumaadka cusub. Haddii bukaanku la soo xiriiro shaqaalaha Isbitaalka si uu ula yeesho heshiis ah dib u bixin ka dib marka kharashka loo gudbiyo qareen ama xafiiska soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey, waxaa qorshe kula heshiin doona qareenka ama xafiiska.
   b. Haddii bukaan/kafaalaqaade la soo xiriiro shaqaalaha Isbitaalka oo uu ka sheegto habdhaqanka xafiiska soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey ee Isbitaalka, wixii macluumaad ah ee la xiriira dhibka bukaanka waxaa loo gudbin doonaa agaasimaha nawaaxiga ee goobta xafiiskaasi ku yaallo.
   c. Haddii bukaan/kafaalaqaade la soo xiriiro shaqaalaha Isbitaalka oo uu ka sheegto habdhaqanka xafiis qareen oo la shaqeysta isbitaalka, wixii macluumaad ah ee la xiriira dhibka bukaanka waxaa loo gudbin doonaa Xafiiska Qareenka Guud ee Isbitaalka.

Cabashada Bukaanka:

1. Diiwaan lagu qoro cabashada bukaanka/kafaalaqaadaha ayaa la dhigi doonaa dhismeyaasha Isbitaalka ee ay si joogto ah ula soo xiriiraan bukaannada dacwo ka qaba soo-qaadidda kharashka caafimaadka.
2. Taariikhda ay isku raacaan labada dhinac ee ku saabsan cabashada habdhaqanka xafiiska soo-qaadidda lacagta ama xafiis qareen oo Isbitaalka la shaqeeya, iyadoo kooban ayaa loo gudbinayaa guddoomiye ku xigeenka dhaqaalaha, oo koobbi ayaa loo dirayaa Xafiiska Qareenka Guud ee Isbitaalka.

U-sii Gudbinta Xafiiska Soo-qaadidda

1. Inta aan kharash la bixin waayey loo gudbin xafiis u sharciyeysan soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey, shaqaalaha Isbitaalka ayaa xaqiijin doona:
   a. In si sax ah loo hubsado in bukaanka lacag lagu leeyahay;
   b. In kafaalaqaadayaasha saddexaad oo dhan qaansheegad loo diray, sida

Lacagaha la Bixin Waayey:

in wixii kharash ah ee harsan uu dhaqaale ahaan bukaanku masuul ka yahay, iyo

c. Kolka uu bukaanku sheegto in uusan si buuxda u bixin karin kharashka hal mar ama qorshe ah marba in, waa in bukaanka loo sheego Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka, iyo haddii ay dan ugu jirto, in la siiyo wakhti macquul ah oo uu ku soo gudbiyo foomka codsiga Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka.
d. Gebi ahaan Shuruudaha Qaanuunka Hay'adda Canshuuraha qeybta 501(r) ayaa la tixraacay

2. Wixii kharash ah ee ka yar $5,000, dibu-eegista sharcigu dhigayo waa in uu xafiiska qaansheegadka ee Isbitaalku ku diyaariyo wakhti caadi ah.
3. Wixii kharash ah ee ka badan $5,000, sida sharcigu dhigayo waa in uu qof agaasime ah ku sameeyo dibu-eegis.

La-xiriiridda Xafiisyada Soo-qaadidda Lacagaha iyo Shirkado Qareen:

1. Isbitaalku wuxuu qandaraas qoraal ah si toos ah ula gelayaa xafiis kasta oo ah soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey. Xafiiska soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey ee la shaqeeya Isbitaalka si ay ugu keenaan kharashyada caafimaadka waxaa mamnuuc ka ah in ay qandaraas hoose la sii galaan xafiisyo kale iyagoo aan oggolaansho marka hore ka helin Isbitaalka.
2. Shirkadaha qareenka ee la shaqeeya Isbitaalka si ay bukaannada uga soo qaadaan kharashyada caafimaadka waxa ay la shaqeyn doonaan Xafiiska Qareenka Guud ee Isbitaalka.
3. Xafiisyada soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey ama shirkad qareen oo la shaqeysa Isbitaalka si ay bukaannada uga soo qaadaan kharashka caafimaadka waxaa laga rabaa in ay ku dhaqmaan Heshiiska sharciga ah ee uu Isbitaalku u saxiixay Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota.
4. Agaasimaha maamulidda dakhliga ayaa masuul ka ah in uu hubiyo xafiisyada soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey iyo shirkadaha qaareenka ee la shaqeeya Isbitaalka ee u soo qaada kharashka caafimaadka in loo tababaro Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka ee ay heli karaan bukaanka/kafaalaqaadeyaasha Isbitaalka.

Kormeeridda Xisaabaadka:

Sannadkiiba mar waaxda dhaqaalaha ayaa sameyn doonta kormeeridda xisaabaadka ee xafiis kasta oo ah qaansheegad ee ku hawlan soo-qaadidda kharashka caafimaadka bukaannada iyadoo la eegayo sharciga ay raaceen. Waaxda dhaqaalaha waxa kale oo ay kormeerid dhaqaale ku sameyn doontaa xafiis kasta oo ka shaqeeya soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey ama shirkad qareen oo la shaqeysa Isbitaalka si ay ugu soo qaadaan kharashka caafimaadka iyadoo la eegayo sharciga ay raaceen sida ku xusan heshiiska uu isbitaalku u saxiixay Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota. Natiijada ka soo baxda kormeeridda xisaabaadka waxaa tixgelin doona maareeyaha guud ee Isbitaalka marka sannadkiiba mar dibu-eegis lagu sameynayo heshiisyada xafiisyada soo-qaada lacagaha la bixin waayey iyo shirkadaha qareenka ee la shaqeeya Isbitaalka si ay ugu soo qaadaan kharashka caafimaadka.

Waxyaabo Kala Duwan::

1. Isbitaalku uma gudbin karo xafiis ka warbixiya sumcadda dadka wax kharash cusub ah oo ka dambeeya May 1, 2005..
2. Wixii codsiyo ah ee ka yimaada shirkad qareen ee lagula wareegayo mushaar uu leeyahay bukaan ama lacago ugu jira hay'ad dhaqaale waa in

loo gudbiyaa qof maamule ah in uu soo oggolaado. Isbitaalku lama wareegayo mushaar ama xisaab bangi ku jirta oo uu leeyahay bukaan ilaa loogu oggolaado xukun ka dhan ah bukaanka oo ay maxkamad ku gaartay in bukaanka laga goosto kharashka lagu leeyahay. La-wareegidda lacageed waxaa la oggolaan doonaa haddii aysan jirin sabab lagu rumeysan karo mushaarka ama lacagaha hay'ad dhaqaale ee bukaanka in laga reebo kala wareegid. Haddii uu bukaan soo gudbiyo cabasho qoraal ah oo uu ku sheegayo in laga reebo kala wareegidda lacageed, qareenka shirkadda saddexaad ee Isbitaalka u soo-qaadda lacagaha la bixin waayey ma diidayo sheegasadaas isagoo aan helin idan ay si kiis ahaan u soo eegeen xafiiska qareenka guud ee Isbitaalka. Si loo go'aamiyo in la yeelo idanka kiis gaar ah, xafiiska qareenka guud ayaa eegi doona dhammaan macluumaadka uu soo gudbiyey bukaanka iyadoo loo eegayo sida bukaanku sheeganayo ka-reebid ah in lacag lagala wareego.

3. Isbitaalku qeyb ahaan kuma yeelan karo bukaan/kafaalaqaade kharashka caafimaadka haddii bukaanku Isbitaalka ku siiyey wakhti ku filan oo ah macluumaad qaansheegad oo kafaalaqaade saddexaad loogu dirsan karo, iyo haddii Isbitaalku wakhti ku filan qaansheegadka qeyb ahaaneed ugu dirsan waayo kafaaqaade saddexaad.

Masuuliyadda Guddiga Agaasimeyaash: Guddiga agaasimeyaasha ama guddi ah wufuud isku dhafan ayaa sameyn doona dibu-eegis sannadle ah oo ku saabsan sharciga iyo shaciyada la xiriira soo-qaadidda kharashaadka caafimaadka ee la bixin waayey, qiimadhimista dadka aan ceymiska haysan iyo kaalmada dhaqaale. Guddiga waxa kale oo uu eegi doonaa natiijooyinka ka soo baxa kormeeridda xisaabaadka sannadlaha ah ee waxyaabahaas la xiriira iyadoo loo eegayo sida uu dhigayo shaciga Heshiiska Qareenka Guud ee Minnesota.